



Haddii aad leedahay [astaamaha COVID-19](#) ama aad xidhiidh dhow lalahayd qof qaba COVID-19 gudaha 14 maalmood ee la soo dhaafay, waa inaad isbaadhaa iyaddoo loo eegin heerkaaga tallaalka. **Marka aad sugayso nitijoooyinkaaga baadhitaanka COVID-19, waa inaad guriga joogtaa oo ka fogaataa kuwa kale.**

## Imisa ayuu noqon doonaa kharashka baadhida COVID-19?



- **Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP)** – Haddii aad haysato [daboolida OHP](#), baadhitaanku waxa uu noqon doonaa bilaashka. Ka baro wax badan oo ku saabsan OHP bogga [ONE.Oregon.gov](#).
- **Caymiska caafimaadka qofka ama kooxda** – Badanka shirkada caymiska caafimaadku way dhaafi doontaa kharashka baadhitaanka COVID-19 haddii aad leedahay astaamaha. La xidhiidh adeeg bixiyahaaga caymiska caafimaadka wixii macluumaad dheeraada ah.
- **Dhacdooyinka baadhitaanka bulshadda bilaashka ah** – Booqo [DoINeedACovid19Test.com](#) si aad uga raadiso dhacdooyinka baadhitaanka Oregon oo dhan.

# Sideen ku heli karaa goobta baadhitaanka?



- **Ma leedahay caymis?** La xidhiidh adeeg bixiyahaaga caafimaadka si aad u hesho goobta baadhitaanka kuu dhow adiga.



- **Isticmaal khariidada la raadin karo** bogga <https://govstatus.egov.com/or-oha-covid-19-testing> si loo helo goobta baadhita ee kuu dhow.



- **Raadi dhacdada baadhitaanka bilaashka ah.** Booqo [DoINeedaCovid19Test.com](https://www.doineeda.com) si aad uga raadiso dhacdooyinka baadhitaanka Oregon oo dhan.



- **Wac 211 wixii ah helida goobta baadhitaanka adiga kuu dhow.**

Fadlan ha booqan waaxda gurmada ee baadhitaanka, iyaddoo aadu baahan tahay daryeelka gurmada astaamahaaga mooyee. Waaxaha gurmada gudaha Oregon dedaal wayn ayay ugu jiraan ka jawaabida korodhka hadda ee COVID-19.